| GUDDIGA DUGSIGA SHURUUCDA DADWEYNAHA EE TENNESSEE | | |
|---|---|---|
| **KU LUG LAHAANSHAHA IYO KA QAYBGALKA WAALIDKA** | | **4502** |
| **LA ANSIXIYAY**<br>**Abriil 9, 2021** | **DIB LOO EEGAY:** | **KORMEERIDA**<br>**Dib u eegista: Si sanadle ah** |

Gudigu waxa uu aqoonsan yahay muhiimada iyo qiimaha ay leedahay ku lug lahaanshaha waalidka iyo qoyska macnaha leh. Iyada oo la kaashanaysa dugsiyadeeda, Guddigu waxa uu raadinayaa in uu dejiyo xeelado iyo qorshayaal wax ku ool ah oo loola falgelinaayo waalidiinta iyo qoysaska qaabaynta, dib u eegista, iyo dhaqangelinta barnaamijka waxbarashada. Gudiga iyo dugsiyadoodu waa in ay u abuuraan jawi soo dhawayneed dhammaan waalidiinta iyo qoysaska oo ay dhaqangeliyaan xeerarka dhiirigelinaya ka qaybgalka waalidiinta ee waxbarashada ilmahooda.

**Masuuliyadaha Degmada.** Si sanadle ah, Gudigu waa in uu kala shaqeeyaa dugsiyadeeda shuruucda ee ruqsada haysta qorshaha degmada ee ururka waxbarashada deegaanka (LEA) si loo dejiyo filashooyinka iyo ujeedooyinka degmada iyo dugsiyadeeda, oo ay ku jiraan ka qaybgalka waalidka iyo qoyska. Wakiil waalid, oo ilmahiisa uu hadda ku jiro dugsi ku jiro LEA, ayaa ah in uu ka mid noqdaa kooxda qorsheynta.

Intaa waxaa dheer, Gudigu waa inuu ku daabacaa dhukumiintiyada waalidiinta mareegteeda oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:

1) Xeerarka LEA, oo leh xeerar gaar ah oo khuseeya ardayda iyo waalidiinta oo lagu turjumay luuqad waalidiintu fahmi karaan; iyo
2) Liiska qiimaynada gobolka iyo degmadu ee rasmiga ah ee uu bixiyo dugsi kasta.

**Masuuliyadaha Dugsiga.** Dugsi kastaa waa in uu qaataa xeer si uu wax uga qabto ka qaybgelinta waalidiinta iyo qoysaska. Xeerkani waa in ay si wadajir ah u soo saaraan waalidiinta oo uu qeexaa sida waalidiinta, ardayda, iyo shaqaalaha dugsigu u wadaagi doonaan mas'uuliyadda guusha ardayga ee sare.[1] Xeerku waa in uu ku jiraa, laakiin aanu ku xaddidnaanin:

1) Xeerka ashtakada iyo cabashada dugsiga oo ay la socdaan xog gaar ah oo ku saabsan sida waalidiinta iyo xubnaha bulshadu ula falgeli karaan guddiga maamulka;
2) Sharaxaad ku saabsan sida dugsigu u qorsheynayo inuu uga qaybgeliyo waalidiinta oo ku saabsan horumarka ardayga oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:
    a. Kaararka macluumaadka natiijooyinka ardayga;
    b. Warbixinada horumarka; iyo
    c. Ogeysiisyada walaaca;
3) Ogeysiinta in dugsigu qaban doono ugu yaraan laba (2) kulan oo waalid iyo macalin oo qorshaysan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka kuwaas oo aan dhacaynin saacadaha dugsiga ee maalin kasta kaas oo loo tiriyo ujeedooyinka kulanka boqol iyo sideetanka (180) maalmood ee waxbarida fasalka, ama aan lagu beddelin maalin waxbaridda fasalka ah;[2]
4) Xaq u lahaanshaha waalidiinta iyo qoysaska inay dib u eegaan dhammaan agabyada waxbaridda, agabyada waxbarashada, iyo imtixaanada ay soo saareen macalimiintu;[3]

5) Xaq u lahaanshaha waalidiinta iyo qoysaska inay dib u eegaan dhammaan sahannada, falanqaynta, iyo qiimaynada, ka hor inta aan la siin waalidiinta ama masuulka sharciga ah ee ilmaha;[4]
6) Ogeysiinta ku darida ugu yaraan hal (1) wakiilka waalidka ah xubin ahaan guddiga maamulka, kaas oo ilmahiisa uu hadda ka diiwaan gashan yahay dugsiga uu maamulo guddiga maamulka;[5]
7) Ogeysiinta ku darida ugu yaraan hal (1) wakiilka waalidka ah xubin ahaan kooxda qorsheynta dugsiga;
8) Ogeysiinta in dugsigu (haddii dugsi Title I ah) uu qaban doono ugu yaraan hal (1) oo ah kulanka Title I ee sannadlaha ah si loogu wargaliyo waalidiinta ka qaybgalka dugsiga ee Title I, shuruudaha Title I, iyo xaqa waalidku u leeyahay ka qayb qaadashada;
9) Xaqiijinta in waalidiinta ardayda aan Ingiriisiga ku hadlin lagu aqoonsado oo lagu siiyo fasiraad ama tarjumid haddii loo baahdo;
10) Ogeysiinta waalidiinta ee sannadlaha ah ee waalidka dugsiga iyo xeerka ka-qaybgalka qoyska, oo ku qoran luuqad uu waalidku fahmi karo;
11) Qaybinta sannadlaha ah ee buug-gacmeedyada ee la siinayo ardayda dugsiga iyo waalidiinta, oo ku qoran luuqad waalidku fahmi karo, oo ay la socoto ogeysiinta Guddiga in buug-gacmeedyada la qaybiyay; iyo
12) Qiimaynta sannadlaha ah ee waxtarka xeerka ka-qaybgalka waalidka iyo qoyska iyadoo la aqoonsanayo:
    a. Caqabadaha ka qayb qaadashada sare ee waalidiinta;
    b. Baahiyaha loo qabo in waalidiinta iyo xubnaha qoysku ay caawiyaan waxbarashada caruurtooda; iyo
    c. Xeeladaha lagu taageerayo isdhexgalada dugsiga iyo qoyska oo guuleysta.

Dugsiyadu waa inay tixgeliyaan baahiyaha iyo qorshaynta waalidiinta shaqeeya markay qorsheynayaan shirarka, hawlaha, ama dhacdooyinka kale kuwaas oo waalidiinta lagu dhiirigelinayo inay ka soo qaybgalaan.

Dugsi kastaa waa in uu qaataa xeer anshaxeed oo dhammaystiran oo qeexaya noocyada hab-dhaqanka laga filayo booqdayaasha soo galaya barxaddaha dugsiga, kaas oo xoogga saaraya muhiimadda:

1) Luuqad haboon;
2) Ixtiraamka qofka iyo hantida dadka kale; iyo
3) Dejinta iyo ilaalinta goob waxbarasho oo badbaado leh, ammaan ah, oo nabad ah taasoo kor u qaadaysa waxbarashada iyo horumarinta dabeecadda wanaagsan.

Xeer kasta oo anshaxeed waa in uu qeexaa noocyada habdhaqanka laga filayo booqdaha soo galaya barxaddaha dugsiga iyo cawaaqibka ka dhalan kara ku guuldaraysiga booqdaha in uu u hoggaansamo xeerarka.[6]

Tixraacyada Sharciga ah:

[1] 20 U.S.C. § 6318
[2] T.C.A. § 49-6-7002
[3] T.C.A. § 49-6-7003
[4] T.C.A. § 49-2-211(b)(1)
[5] T.C.A. § 49-13-109
[6] T.C.A. § 49-6-2020.

Tixraacyada Sharaxaada:

Agabyada Waxbarashada
Xeerka Guddiga Gobolka 4.207
Dalacsiinta iyo Xajinta, Dhibco
siinta,

Qiimaynta 4603